

Warbixin Gaar ah:

## Aqoonyahanka iyo Muwaadiniinta Somaliland oo farahooda lagu kaydiyo Garoowe

*Qorshihii Cabdillaahi Yuusuf uu Embaghati ku soo degay oo shaqaynaya!*



Caydaruus C. Jaamac (maaha magaciisii runta ahaa) waa aqoonyahan reer Somaliland ah, wuxuu ka shaqeeyaa mid ka mida **Hay'adaha Caalamiga ah (INGO's)** ee ka hawlgala JSL xarunteeda caasimadda ee Hargeisa wuxuuna ka yahay Maareeye Waaxeed. Haddaba Sannadkii tagey Caydaruus waxa usoo baxay kooras ama **Seminar** loogu dirayo waddanka Kenya magaalada madaxda **Nairobi**. Si u safarkaas u tagana waxa lagu yidhi **Passpor-ka TFG ee Garoowe** laga qaato waan inaad soo qaadataa oo ah ka kaliya ee la oggolyahay! Kii Soomliyadii horena lama oggola ka Somaliland na hadalkiisaba daa!

Caydaruus wuxuu u kicitimay magaalada Garoowe, wuxuuna u gudbay waaxda socdaalka halkaas oo lagaga reebay macluumaadkan:

**Magaca oo Saddexan:** Caydaruus C. Jaamac

**Markuu dhashay:** 1978

**Meeshuu ku dhashay:** Burco

**Magaca Hooyada:** Cibaado Cali Cawed

**Dhererka:** 1.79 M

**Midabka Indhaha:** Madaw

**Calaamad gooniya:** Ma Jidho

**Iyo dhammaan macluumaad shakhsiya ee passport u baahanyahay oo dhan oo dheeraada sida Saxeexa, Sawirka iwm.**

Ugu dambay waana TA UGU DARAN eh, waxa laga qaaday **farihiisii (fingerprint)** laguna daray kaydka Computer-ada Garoowe yaalla ee muwadiiniinta Jamhuuriyada Federaalka Soomaliyeed lagu kaydiyo!!!

Haddaba akhriste, maaha sheekadani mala-awwaal, adiguba si dhibyar ayyaad u soo xaqiijin kartaa, waxaadna ogaataa in dhammaan dhalinyarta iyo shaqaalaha ka shaqeeya hay'daha caalamiga ah ee Somaliland lagu xidho paasporkan isla mar ahaantaana lagu kaydiyo macluumaadkooda xarumaha Garoowe ee maamulka Puntland kuwaas oo ahaa fulin qorshe uu mar hore Embaghati ku soo degay **Madaxwiyenihii Puntland iyo TFG ee Col. Cabdillaahi Yuusuf** si uu muwaadiniinta Somaliland u hoos keeno Puntland isla mar ahaantaana caalamka looga dhaadhicyo in Somaliland ay tahay gobol ka mida aqoonyahankeediina (iyo caddaynta farahoodiina ay yaallaan Garoowe!). Ujeeddada ugu weyn waa in:

- 1) La tuso caalamka in Hargeisa, Burco, Laascaanood iyo Boorama ay yihiin uun gobollo ka mida Soomaaliya caddayntuna tahay in muwaadiniintoodu illaa hadda passporada si caadiya uga qaataan Garoowe lana hayo farahoodii
- 2) In ay u noqoto qancid ra'yil caalamka in dadku ay meel walba maamul ahaan ay isugu mid tahay, cidda Somaliland wadataana uun ay tahay Siyaasiyiin mansab doona, arrintanina ay caddayn u tahay (waa qaadashada passport-kee)
- 3) In faraha iyo macluumaadka lagu kaydinayo Garoowe ay u noqon doonaan maamulka Garoowe gorgortan in laga dhigo caasimadda Soomaaliya maadaama
  - a. "muwaadiniinta" Soomaliya ay passprada ka qaataan,
  - b. magaalo ahaan meel dhexe ku taallo,
  - c. ciyaaraha Somaliya lagu qabto oo Somaliland ka qaybgashay!!
  - d. shirka ururada dumarka Soomaaaliyeed!!! Oo Somaliland isagana ka qaybgashay! (intuba waa sawirro u addeegaya qorshe taxan)
  - e. iyo qorshayaal qarsoon oo hadda aynaan ogayn intaba

### **Xukuumadda Somaliland oo hurudda:**

Arrintan ayyaa haba yaraatee aanay xukuumadda Somaliland ah wax wara ka hayn ama hadday ka haysana aanay wax xila iska saarin khatarta iyo tabcooyinka maamulka Puntland ay ku fulinayaana

aan haba yaraatee uba soo jeedin. Waxaanad moodaa in mar dambe ay hambabaraan oo masku madaxa ka qaniinay!

### **Maxaa xal ah:**

Xukumadda Somaliland waa inay si degdeg ah ugu soo rogto hay'adaha caalamiga ah in shaqaaladeeda dibbada Seminar loogu dirayo aanay u horseedin in ay Puntland passport uga daba fadhiistaan iyadoo kala dooransiin karta:

- 1) In passportka Somaliland ay isticmaalaan oo imikaba wadamo ka horumarsan Kenya iyo Uganda lagu tago, isla mar ahaantaana ay kala xaajadoon Kenya iyo dawladaha la dariska ahba arrintan
- 2) In haddii ay taas yeeli waayaan, lagu khasbo inay seminaraa-adooda ku dhigaan wadamo lagu gali karo passportka Somaliland ama passportkii hore ee Soomaliya oo ay Hargeisa ka qaadan karaan dadku
- 3) In haddii ay labadaas qodob ee sare socon waayaan, lagu khasbo inay Seminarada waddanka gudhiisa ku bixiyaan oo leh Hotel-lo caalamiya isla mar ahaantaana u noqonaysa dakhli dheerada dhaqaalaha waddanka
- 4) In haddii ay intaaba yeeli waayaan, ay xukuumaddu MAMNUUNCDO in muwaadiniinteedu ay qaatan Passportka TFG ee Puntland ee lagu kaydiyo farahooda iyo macluamadkooda Puntland kaasoo ku salaysan qorshayaal Federaali ah oo madaxbannaanida JSL mija xaabinaya.

### **Gunaanad:**

Hadaba si looga hortago tabcadan dahsoon ee Puntland ay hoos dhigtay mar horeba oo hadda u eg inay shaqaynayso ayyaa u baahan in deg deg looga hortago lagana hawl galo sidii mijixaabina ummaddan looga hortagi lahaa.

Nin kuu digay kuma dilin!

Wabillahi tafwiiq

Mustafa Ahmed

UK

mustafe82@yahoo.com